






Somalisk

Gauldal Energi – xog ku saabsan korontada

Korontadu waxa ay ka kooban tahay labo qaybood: Korontada iyo kirada shabakadda (nettleie). Adaa dooran kara shirkadda korontada ku siinaysa, laakiin waa in aad kirada shabakadda siisid shirkadda leh shabakadda aad isticmaashid.

Gaudal Energi waxa ay koronto ka iibisaa Noorway oo dhan waxaanay kuu haysaa badeecadahan:

| | | |
|---|---------------------------------|--|
|  | Dareerto | Wuxu la socdaa qiimaha aannu suuqa kaga soo iibsano. Qiimuhu waxa uu la socdaa isbeddelka xilli-sannadeedyada. |
|  | Dareerto qiimuhu xadaysan yahay | Wuxu la socdaa qiimaha aannu suuqa kaga soo iibsano, laakiin waxa isla markaas lagaa ilaalinaya qiimaha sare. «Sida ugu wacan labada adduun ba» |
|  | Joogto | Muddo lagu heshiiyey ayaad helaysaa qiimaha kWh oo joogto ah. Waxa aad ka maarmaysaa la socodka isbeddelada suuqa. |

Sida kale waa in aad kirada shabakadda siisid shirkadda leh shabakadda.

Ma degan tahay degmada Midtre Gauldal ama degmada Holtålen?

- Hal xisaab (faktura) oo keliya ayaa lagu soo diraya haddii aad dooratid Gauldal Energi
- Xisaabtu waa bishii mar, kadib isticmaalka korontada iyo akhrinta cabbiraha.
- Waxa aad helaysaa adeeg macmiil oo degaanka ah
- Ma u baahan tahay internet dheereeya, wac Gauldal IKT Tel. 72 43 80 40
- Ma u baahan tahay korontiste, wac Gauldal Installasjon Tel. 72 43 80 10

Nala soo xidhiidh, markaas ayaanu ku caawin!

Tel. 72 43 80 00 (isniin-jimce 8.00-15.30)

post@gauldalenergi.no

www.gauldalenergi.no

